SHIR WADA TASHI
LABO BEELOOD OO KA MID AH BEELAHA DEGA JUBALAND

WAR- MURTIYEED

9.Oktoobar.2018

Iyadoo laga duulayo nabad wadaaga beelaha degaanka Jubaland, kana dhaxeeya dhiig, dhaqan iyo wada dhalasho, taasoo ah mid soo jireen ah oo waligood kuwada noolaayeen. Beelahaan oo ah kuwo nabada dowladnimada jecel mar kasta u taagan ilaalinta midnimada, dowlinimada iyo qaranimada Soomaaliyeed.

Maanta oo taariikhda tahay 9ka Oktoober 2018, Hotel Hawa Tako, kuna yaal caasimada dalka ee Muqdisho ka qabsoomay shir ay ka soo qeybgaleen Wasiiro, Sanatero, Xildhibaano heer Federaal ah iyo Siyaasiyiin ka soo jeeda laboda beelood oo ka soo jeeda beelaha Jubaland, waxay soo saareen war murtiyeedkan.

1. In la ilaaliyo midnimada iyo wada jirka beelaha walaalaha ee wada dega Jubbaland, lagana wada hortago wax kasta oo keeni kara khilaaf, isku dhac beeleed iyo burburka Jubbaland.

2. In Dawlada Federaalka, Dawlad Goboleedka Jubbaland iyo AMISOM ay u istaagaan xoreeyta dhamaan degaanada ku jira gacanta xagjirka. Waxaana ka tacsiyeeynaynaa dhibaatooyinkii iyo khasaarahii naf iyo maalba lahaa ee soo gaaray shacabka Jubbaland kana soo gaaray duqaymihii diyaaradaha. Waxaana ugu baagaynaa Dawlad Federaalka Soomaaliyeed iyo Maamul Goboleedka Jubaland inay arrintaas wax ka qabtaan.

3. In Dawlad Gobaleedka Jubaland ay shaaciso kuna dhawaaqdo nidaamka iyo habraaca doorashooyinka 2019 sida ku xusan Dastuurka kumeelgaarka ah ee Jubaland Cutubkiisa 4aad, Qobodkiisa 67aad, Firqadiisa 1aad, 2aad, 3aad, 4aad, & 5aad.

4. In ay dhacdo doorasho cadaalad ah, kuna qabsoonta waqtigii loogu tala galay, qeybtoodana ka qaataan dawladaha iyo hey'adaha taageera Somaaliya si looga fogaado tuhun, si xor ahna u dhacdo doorashada.

5. Shirwaynuhu wuxuu isla qaatay in si buuxda loo garab istaago Dawladda Federaalka ee Soomaaliya sidoo kale waxaa shirku ku taliye in la yareeyo khilaafka ka dhexeeya Dawlad Goboleedyada iyo Dawladda Federaalka wadahadal lagu dhameeyo wixii tabasho ah.

Uga dambayn Mas'uuliyiinta shirka ka soo qaybgalay waxay isku raaceen in la magacaabo Gudi Farsamo oo soo diyaarinaya shirweyne looga tashan doono aayaha iyo mustaqbalka Jubaland.

Sidoo kale waxaan aad ugu mahad celinaynaa Mas'uuliyiinta taladooda iyo aragtidooda qaaliga ah ku soo kordhiyey shirkeena taariikhiga ah iyo xubnaha beesha caalamka oo talooyinka iyo iskaashiga wanaagsan ilaa hada nala wada.

Waxaan dhamaan beelaha reer Jubaland u balan qaadaynaa inaan marnaba la lumin doonin kalsoonidooda.

WABILLAAHI TAWFIIQ

Dhamaad